

# Nala qaybsso waxa aad u rajaynaysid Fælleshuset in lagu qabto!

## KU: Dadka deegaanka iyo ururada qaaliga ah ee ku nool Bispehaven

Fælleshuset waa wadnaha bulshada deegaanka, waxaana rabnaa inaan ka dhigno xarun firfircoon oo waxqabadyada, bulshada iyo ka-qaybgalka. Sidaa darteed, waxaanu ku dhiirigelinaynaa dhammaan kooxaha danaynaya iyo shakhsyaadka inay wadaagaan fikradahooda iyo rabitaankooda inay u isticmaalan Fælleshuset faa'iidataada wanaagga guud.

### **Maxaad qaban kartaa:**

Haddii aad hayso fikrad waxqabad, dhacdo ama aad rabto inaad abuurto urur, waxaanu jeelaan lahayn inaan kaa maqalno! Husrådet oo cusub ee Fælleshuset wuxuu diyaar u yahay inuu helo codsiyadaada iyo fikradahaaga.

Fadlan noo qor oo nagu caawi inaan abuurno bulsho firfircoon oo dhiirigelin leh gudaha Fælleshuset.

Waxaad ka heli kartaa warqada codsiga halkan:

<http://bispehaven.dk/faelleshuset/faelleshusets-puls-husraadet>

Codsiga markaad buuxisid waxaa u geyn kartaa Fælleshuset - Rymarken 33, 8210 Aarhus V – ama waa u dhiibi kartaa shaqaalaha boligsocial-ka Cæcilie Olesen – [csoles@lejerbo.dk](mailto:csoles@lejerbo.dk)

Codsiga waa in la helaa ugu dambayn 21 January

### **Wasashaqayn iyo Wadajir:**

Waxaan dhiirigelineynaa in wadashaqaeyn laga abuuro ururada iyo frivillige si loo abuuro waxqabadyo kala duwan oo xiiso leh. La wadaag mas'uuliyadda iyo hawlahaa.

### **Xasuuso – Qofkasta ayaa Fælleshuset lagu talagalay:**

Waxa ugu muhiimsan waa in Fælleshuset u furan yahay qof walba, qof walbana waa la soo dhaweynayaa. Aynu si wadajir ah u abuurno meel firfircoon oo loo dhan yahay, halkas oo bulshada iyo hawlulu ay ka soo baxaan.

### **Information oo Muhiim eh:**

Waa muhiim in la fahmo in codsigu kaa ballan qaadi karin meel ama boos ama wax xuquuq ah oo gaar ah inaad urur ku maamusho Fælleshuset..

Waxaan qiimaynaa fursadaha iyo xuquuqda loo siman yahay ee qof kasta, Husrådet waxa uu u xilsaaran yahay qaybinta hawlo waxtar u leh bulshada.

### **La xiriir husrådet:**

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, waxaad nagala soo xiriiri kartaa shaqaalaha boligsocial Cæciliies Olesen ([csoles@lejerbo.dk](mailto:csoles@lejerbo.dk) Mobil: 30 84 50 60)

Waxaan rajeyneynaa inaan helno fikradahaaga iyo wax ku biirintaada, isla markaana aan si wadajir ah u abuurno Fælleshas qalbi furan oo nool!

Salaan wanaagsan,

Golaha cusub  
Fælleshusets husråd